# Barnaamijkeena Caawimaadda Gillette (Gillette Assistance Program (GAP)

**Ujeedada:**

Gillette Children's waxaa ka go'an inay siiyaan daryeelka caafimaad ahaan lama huraanka u ah bukaanadeena, iyaddoon loo eegin kartidooda bixinta qarashka. Xeerka Barnaamijkeena Caawimaada ee Gillette wuxuu ka shaqeeyaa inuu xaqiijiyo qaab cadaalad ah oo joogto ah oo dib u eegis loogu sameeyo barnaamijka caawimaada dhaqaalaha oo loo yaqano Barnaamijka Caawimaada Gillette (Gillette Assistance Program (GAP).

**Xeerka:**
Xeerkaan wuxuu qeexayaa shuruudaha u qalmida iyo helitaanka caawimaada dhaqaalaha ee adeegada lagu baxsho Gillette Children's Specialty Healthcare ee uu baxsho barnaamijkeena Gillette Assistance Program. Caawimada lacagta waxay ku salaysnaan doontaa go'aan gaadhida baahida dhaqaale, oo kuma xisaabtami doonto da'da, jinsiga, sinjiga, heerka muhaajirnimada ama diinta qofku ku xidhanyahay.

*Waxaa kareeban daawooyinka waxyaabaha nool iyo bukaanada Calamiga ah laga sameeyo*

**Nidaamka:**

**U qalmida**
Si ay ugu qalmaan qiimo dhimista Gillette Assistance Program, bukaanka/damiinka waxaa qasab ku ah:

1) Ka diwaangelinta bukaanka dhammaan lacag bixiyayaasha saddexda xisbi ee la heli karo iyo qorshayaasha dowladda.

2) Inay isticmaalaan dhammaan faa'iidooyinka laga heli karo lacag bixiyayaasha kooxda saddexaad iyo qorshayaasha dowladda.

3) Inay si buuxda u raacaan shuruudaha gudbinta codsiga caymiska ee qolada sadexaad iyo qorsheyaasha dawlada, ayna ku jiraan isku dubaridka gunnooyinka.

4) Inay si buuxda ugu hogaansamaan hanaanka codsiga ee Gillette waqtiga ku haboon ayna si degdeg ah u keenaan xogta ay codsato Gillette inta lagu jiro hananaka codsiga haddii la heli karo.

5) Inay leeyihiin dakhliga guud ee qoyska oo sanadle ah, kaas oo ka hooseeya 400% ee heerka saboolnimada federaalka (FPL).

**Aasaaska Xisaabinta Lacag dhimista GAP**
Heerka saboolnimada federaalka (FPL) waxaa loogu daabacaa si sanadle ah Diiwaanka Federaalka oo waxa uu noqon donaa aasaaska hagitaanada loo isticmaalo codsadayaasha GAP.

| **Dakhliga Guud ee Qoyska** | | |
|---|---|---|
| **oo ah boqolkiiba** | | **GAP** |
| **Heerka Fakhriga Federaalka (FPL)** | | **Qiima** |
| | | |
| Ilaa 250% ee FPL | | 100% |
| | | |
| Laga bilaabo 251% ilaa 300% ee FPL | | 50% |
| | | |
| Laga bilaabo 301% ilaa 400% ee FPL | | 25% |

**Qadarka Xisaabinta Lacag dhimista Biilka la dalbaday guud ahaan.**
Bukaanka u qalma GAP laguma soo dalaci doono wax ka badan qadarada guud ahaan biil lagu soo diray (AGB) bukaanada caymiska. Gillete waxay isticmaashaa qaabka "dib u eeg" si loo xisaabiyo AGB iyaddoo la qaybinayo qadarka lacag bixinta ee dhammaan sheegashooyinka ka yimid lacag bixiyayaasha gaarka ah iyo Medicare 12 bilood muddo ah ee qadarka la xidhiidhka kharashka sheegashada. AGB waxaa laxisaabshaa sanad kasta waxaadna kuheli kartaa adoo waca U Qareenadeena Dhaqaalaha ood ka helayso 651-325-2235.

**Adeegyada Aan U qalmin sida ku cad GAP**

1. Adeegyada ay baxshaan adeeg bixiyaasha aan Kamid ahayn Gillette ama xarumaha; adeegyada ay dalbadaan qarashkooda adeeg bixiyaasha aan ku jirin Liiska Adeeg bixiyaha ee GAP
2. Adeegyada farmashiyaha tafaariiqda iibsha ayna ku jiraan daawooyinka ama agabka dukaannada laga iibsado
3. Bukaannada aan ahayn Muwaadiniinta Maraykanka ama muwaadiniinta Maraykanka ee ku nool meel ka baxsan Maraykanka uma qalmaan GAP. Dadkana uma jiraan shaqsiyaadka aan sharciga haysan ee ku nool Maraykanka.
4. Habraacyada saxda ah, adeegyada dadku iskood iskaga dhiibaan ee ikhtiyaariga ah iyo adeegyada loo arko inaysan caafimaad ahaan muhiim ahayn iyo/ama aysan badanaa daboolin shirkadaha caymiska ma daboolaayo GAP, ilaa in adeegga loo arko maahee daryeel muhiim ah. Ujeedada xeerkaan awgiis, Gillette ayaa xaq u leh inay go'aansato, qof iyo kiiskiis, in daryeelka iyo adeegyadu buuxsheen qeexitaanka iyo heerka "caafimaad ahaan muhiim ah" si loogu arko inay u qalmaan GAP.

**U qalmida la qiyaasay**

Haddii bukaan ama damiin uu u muuqdo inuu u qalmo Barnaamijka Caawimaada ee Gillette laakiin uusan soo gudbin codsiga GAP si loogu sameeyo go'aaminta caawimaada, Gillette Children's ayaa gaari karta go'aanka u qalmida qiyaasta ah.

1. Gillette ayaa adeegsan karta qiyaasta u qalmida ay bixisay qolo sadexaad ee ku aadan u qalmida bukaanka/damiinku u qalmo GAP iyo inay bixiso qiimo dhimista GAP ee buuxda ama nuska ah oo lagu daboolaayo qarashaadka looga leeyahay adeegga.
2. U qalmida qiyaasta ah ee barnaamijyada caymiska caafimaadka Gobalka iyo Federaalka laguma tixgelinaayo codsiga GAP.

**Sida loo Codsado GAP**

1. Ka hel codsiga GAP kaas oo laga heli karo miiska hore ee dhammaan goobaha Gillete ama waxaa laga soo dejin karo websaydka Gillete, gillettechildrens.org. Sidoo kale waxaad codsan kartaa codsi addoo soo wacaya 651-325-2235.

2. Dhammaystir codsiga GAP oo ku dar nuqulada dhammaan qoraalka caddaynta ah ee lagu waydiiyo codsiga. Codsiga la buuxshay waa in iimeelka loogu diraa financialassistance@gillettechildrens.com ama loo diraa:

   Gillette Children's Specialty Healthcare
   Fiiro gaar: Charge Integrity—GAP
   Internal Zip #010609
   200 University Ave. E. St.
   Paul, MN 55101 Fax:
   651-325-2174

3. Haddii macluumaad dheeraad ah loo baahdo, waxaa kula soo xidhiidhi kara Qareennada Dhaqaalaha ee Gillette.

4. 30 maalmood gudahood ka dib helitaanka codsiga dhammayska tiran iyo dhammaan warqaddaha caddaynta ah, Gillete waxay qiimayn doontaa codsiga oo waxay kugu wargelin doontaa adiga qoraal ahaan u qalmidaada GAP.

5. Codsiga dhammayska tiran ee GAP waxa uu dhaqan geli doonaa 12 bilood. Dhammaadka muddada 12 bilood, codsi kale oo GAP waxaa loo baahan doonaa in la dhammeyo. Haddii aad rumaysantahay duruufahaagu inay isla beddelaan wareega GAP ee 12 bilood taas oo awood u siin lahaa u qalmida lacag dhimista sare ee GAP, waa inaad soo gudbisaa codsi cusub wakhti kasta

**Biilka Gaarka ah iyo Xeerka Lacag ururinta**
Falalka Gillette ay qaadi karto dhacdada lacagta aan la bixin waxaa lagu sharaxay Biilka Gaarka ah iyo Xeerka Lacag ururinta. Nuqul bilaasha ah oo Biilka iyo Xeerka Lacag ururinta waxaa laga heli karaa iyaddoo codsi qoran loo dirayo:

Gillette Children's Specialty Healthcare
Fiiro gaar: Xafiiska Biilka—Xeerka Biilka iyo Lacag Aruurinta
Internal Zip #010609
200 University Ave. E.
Saint Paul, MN 55101

**Warqadaha la xidhiidha**
Codsiga Barnaamijka Caawimada Gillette — Ingiriisi
Codsiga Barnaamijka Caawimada Gillette — Isbaanisha
Codsiga Barnaamijka Caawimada Gillette — Soomaali
Codsiga Barnaamijka Caawimada Gillette — Hmong GAP
Liiska Adeeg bixiyaha

**Tixraacyada:** WAXBA

**XEERKAN WAXA UU BEDDELAYAA WIXII AH XEERARKII AMA DHAQANADII HORE EE GILLETTE**